

**Buug yar**  
**oo ku saabsan Xuquuqahaaga, Wajibaadkaaga iyo Habka-isdhexgalka**

Marwada sharafta leh, Mudanaha sharafta leh,

Maadaama aad dalbatay caawitaanka Daryeelka Bulshada oo lagaa kabayo Hab-nololeedka sida uu tilmaamayo Sozialgesetzbuch Zweites Buch (SGB II) Buuga labaad, waxaan markaas rabnaa inaan halkaan kugu siino warbixin yar oo ku saabsan Xuquuqahaaga, Waajibaadkaaga iyo Habka-isdhexgalka. Fadlan u fiirso tilmaamahaan soo socda kuwaasoo ah kuwo adiga Dani kuugu jirto, gaar ahaan si aad oga digtoonaatid wixii dhibaato kuu keenaya oo dhan.

Haddii ay noqoto in lagu oggolaado Daryeelka Bulshada oo lagaa kabayo Hab-nololeedka sida uu tilmaamayo SGB II waxaa laraacayaa Xeerarkan soo socda:

**Caawitaanka aad helaysid sidii aad shaqo ku heli lahayd**

Kabitaanka lagaa kabayo xagga Daryeelka ee Hab-nololeedka waxaa dheer in aad helaysid Talo iyo Tusaale dhexdhexaadin ah, ulajeedaduna tahay sidii aad ku heli lahayd Shaqo rasmi ah oo laga bixiyo caymiska Bulshada. Qofka Shaqada kula raadinaya wuxuu kula fiirinayaa Go'aamada ah, sida iyo waxyaalaha loo baahanyahay oo lagama maarmaanka u ah Habka-isdhexgalka iyo sidii aad shaqo u heli lahayd, waxyaalaha aad ku fiicantahay iyo sidoo kale in lafiirinayo xaaladdaada nolosha say hadda tahay oo markii waxyaalahaas oo dhan lagu sameeyo baaritaan dhamaystiran kadib laga gaarayo Go'aan ayadoo la tixgalinayo waxyaalahaas oo dhan. Waxyaalaha kaloo lagaa caawinayo waxaa kamida in lagu soo celinayo kharashka kaaga baxay Codsiyada iyo sidoo kale in lagu soo celinayo kharashka aad ku raacday Gaadiidka marka laguugu yeero waraysi.

Waxaa intaa dheer in Kommunale Kreisjobcenter des Landkreises Fulda laga helo caawimaad shakhsiyeed, taasood faahfaahinteeda aad ka heliysid Qofka ku qaabilsan wadahal gaar ah kadib.

Haddaad rabto caawitaanadaas inaad heshid, waa inaad kahor soo codsatid. Habka aad u dalbanaysid faahfaahinteeda waxaad ka helaysaa Qofka Shaqada kula raadinaya. Waxaan kaloo ku ogaysiinaynaa, kharashka aad sii bixisay adoon soo codsanin in aan markaas dib lagaaga soo celinayn.

**Waajibaadka aasaasiga ah ee Habka-isdhexgalka**

Caawitaanka aad helaysid waxaa lasiman ama lasocda in aad xaggaagana dadaal kala timaadid. Adiga iyo qof walba oo Guriga kugula nool oo leh awood uu ku shaqeeyo, waxaa waajib ku ah sida ugu dhakhsaha badan ood oga bixi lahaydeen caawitaanka ama u yarayn lahaydeen.

Waxaa ku saaran Masuuliyad ah in aad si firfircooni leh oga qaybqaadatid sidii aad Shaqo ku heli lahayd, iyo tallaabo kasta oo lagu gaarayo Arrintaas iyo tan Habka-isdhexgalkaba.

**Arjiyada iyo Caddaymaha**

Soo gudbinta Caddaymahaan soo socda waxay ka hortagayaan inay yimaadaan Su'aalo badan waxayna Shaqada u fududaynayaan Qofka Shaqada kula raadinaya waxay kaloo fududaynayaan sidii loo heli lahaa waxyaalaha kugu haboon ee Habka-isdhexgalka.

- Arji dhamaystiran oo si taxadar leh loo buuxbuuxiyay
- Waraaqahaaga Codsiga oo ugu dambeeyay
- Caddayn ah waxyaalaha aadan qaban karin, tusaale ahaan xagga Caafimaadka ama Carruur cid kaa haysa aysan jirin

**Kartidaada**

Sida uu tilmaamayo Buugga SGB II waa waajib ku saaran, in aad qaadatid Shaqo walba, oo aad kasoo bixi kartid Maskax ahaan, Nafsad ahaan iyo Jir ahaanba. Marka laga reebo Arrimahaan soo socda tusaale ahaan

- ka shaqaynta Shaqadaas hadday tahay mid dhib u keenaysa barbaarinta Carruurta, Oggaysiin: Haddii Canugu ay sadex Sano u buuxsantay, oo uu markaas haysto boos Xannaaneed ama si kale loo hayo, markaas kuma jirto barbaarintiisa wax dhib ah.
- ka shaqaynta Shaqadaas hadday iskeeni waydo qof ehelka kamid ah oo guriga lagu hayo daryeelkiisa, ama aysan jirin si kale oo qofkaas loo hayo,
- ama uu jiro Qodob kale oo muhiim ah oo diidaya inaad shaqadaas ka shaqaysid.

Ma'aha Sabab muhiim ah oo lagu diidi karo Shaqo lagu soo helay gaar ahaan, haddii

- Shaqada lagu soo helay ay u dhigmin tii hore oo aad ka shaqayn jirtay ama aad soo baratay,
- meesha Shaqada lagaaga soo helay ay ka fogtahay tii hore ama
- xaaladaha Shaqada ay ka xunyihiin tii hore.

#### **Wargalinta isbedalka**

Sideedaba waa in Isbedal kasta oo adiga shakhsi ahaan kugu yimaada(tusaale ahaan Shaqo aad heshay, Kharash dheeri ah oo kusoo gala, Shaqo aad joojisay, Cinwaankaaga hadduu isbedalo iwm.) waa in aad sidii ugu dhakhsaha badan ugu soo gudbisid Qofka ku qaabilsan ama Qofka Shaqada kula raadinaya. Waxaan kaloo halkaan kugu ogaysiinaynaa, haddii Daryeelka Bulshada lagu sameeyo khayaano ama Shaqo suuq madow ah in markaas xagga Xafiiskanaga Dacwo lagugu furayo.

#### **Sida lagu helikaro**

Iska hubi, maalmaha laga shaqeeyo Xaafiisyada dhexdooda in uu kaa heli karo Qofka Shaqada kula raadinaya Cinwaanka aad soo gudbisay Boosto ahaan ama shakhsi ahaanba.

#### **Fasaxyada/ ka maqnaanshaha Degaanka**

Waxaad haysataa Fursad aad oga maqnaan kartid meesha aad degantahay oo aad ku tagi kartid meesha aad (degantahay) agagaarkeeda sanadkiiba muddo 21 maalmood ah, marka uu kuu oggolaado Qofka Shaqada kula raadinaya kadib. Oggolaanshaha waxaa kaliya oo la bixinayaa, haddii ay wax dhib'ah u keenayn Shaqada lagula raadinayo inta aad maqantahay. Fadlan soo gudbi Codsiga bixitaanka wakhtigaad rabto inaad baxdid ilaa Todobaad **kahor** oo waxaad Codsiga ka dalbanaysaa Xaafiiskanaga qaybta adeegga. Sadexda billood oo ugu horaysa marka Daryeelka Bulshada lagu bilaabo kadid lama oggola bixitaan, maadaama ay dhacayaan waraysiyada ugu horeeya iyo habkii aad oga mid noqonlahayd Bulshada.

Maqnaansho kasta oo aan lagu oggolaan wuxuu keenayaa, in lagaa jarto Dhaqaalaha (Arbeitslosengeld II) iyo inaad soo celisid Dhaqaalahaad qaadatay intaad maqnayd.

#### **Waajibka Fariimahaaga/Casummaada waraysiga**

Si'ay u fududaato habka aad oga mid noqonlahayd Bulshada, waa lagama maarmaan waraysiga shakhsi ahaanta ah. Hadday kuu timaado Casumaad ka socoto Qofka Shaqada kula raadinaya, waa waajib ku saaran inaad waraysigaas ka soo qayb gashid.

#### **Markaad Shaqada awoodin**

Haddaad xanuunsato oo aadan shaqayn karin, waa inaad islamarkiiba laga bilaabo maalinta 1aad oo xanuunku ku qabtay u soo sheegtid Kommunalen Kreisjobcenter. Caddaynta Dhakhtarka waa inaad muddo 3 maalmood gudaheed kusoo gudbisid.

Buugga yar oo ku saabsan Xuquuqahayga, Waajibaadkayga iyo habka Isdhexgalka waan fahmay waana aqoonsaday.

Taariikhda

Saxiixa Qofka Arjiga codsanaya